



Adeegyada dadwaynaha ee guryaha Seattle (SPU) waxay si aad ah ugu dadaashaa in goobaheena dhismuhu ammaan u yihiin shaqaalaha, shaqaalaha shaqada, iyo dadweynaha. Inta dhismuhu socdo, mashiinno cul culus, qalabyo, iyo alaabaha ayaa halis noqon kara. Sababtaas awgeed, waxaan kaa codsaneynaa inaad raacdo talooyinkan badbaadada.

## Talooyinka Guud

- Mar kasta oo ay suurtoagal tahay, iska ilaali inaad u dhowaato aaga dhismaha.
- Raac dhammaan calaamadaha taraafikada iyo jihoooyinka shaqaalaha shaqada iyo calankooda.
- Ka feejignow oo ka fogow waxyaabaha carqaladeeya markaad ku jirto ama ku dhowdahay aaga dhismaha.

## Darawal lada/Rakaabka

- Fadlan ha ku kaxayn baabuur goobta dhismaha. Waxaad khatar u geesan kartaa inaad dhaawacdo naftaada iyo shaqaalaha dhismaha. Haddii ay tahay inaad baabuur ku dhex maro aagaga shaqada kasocoto si aad u gaarto guri ama meherad, fadlan si taxaddar ah u raac tilmaamaha shaqaalaha ee goobta.
- Markaad ka baxaysid waddadaada, gadaal iska hubi haddii hawlaha dhismaha ama qalabku in ay ku hortaagan yihiin.
- Haddii jidkaaga ama dariiqaaga la xannibo, xusuusnow inaad baabuurkaaga u wareejiyo meel ka baxsan goobta dhismaha ka socdo ka hor intaan shaqadu bilaaban.



## Dadka lugeenaya

- Tartiib usoco oo raac calaamadaha kuu sheegaya meesha aad ku soconayso oo ay ka mid yahiim kursiga curyaamiinta ama baaskiilka.
- Jooji, fiiri, oo dhegayso baabuurta dhismaha iyo mishiinada. Hubi in uu darawalku ku arko haddii ay kugu dhow yihiin.
- Iska fiiri laamiga ama waddooyinka aan sinneen.

## Helitaanka

La xiriir maareeyaha mashruuca SPU si aad u ogeysiiso haddii aad leedahay baahiyo gooni ah oo ku saabsan

*Fadlan **ha u dhawaanin** goobta qodista ama dhismaha si aad ula hadasho shaqaalaha dhismaha. Haddii aad ra'yi ama wax su'aalo ah oo ku saabsan amniga dhismaha aad qabtid, fadlan nagala soo xiriir lambarka/emaylka ku yaal ogeysiiska mashruuca ee aad heshay.*

Wixii macluumaad dheeraad ah, fadlan soo booqo: [www.seattle.gov/utilities/constructionsafety](http://www.seattle.gov/utilities/constructionsafety)

**Waad ku mahadsan tahay sida aad noogu caawisay inaan ka dhigno goobteenna dhismaha meel ammaan !**